

QAYBTA F:
MACLUUMAADKA WAXBARASHADA EE DIYAAR LOOGU NOQDO
IMTIXAANKA AQOONTA BULSHADA (TAARIKHDA IYO DAWLADDA)

Waxay noqonaysaa in aad karto in aad akhriso, qorto iyo ku hadasho af Ingiriiska dadka lagula xiriiro. Sidoo kale waa in aad taqaan taariikhda iyo dawladda Mareykanka (oo loo yaqaan *aqoonta bulshada*).

Aqoontaada af Ingiriiska waxaa lagu imtixaani doonaa waxyaabaha soo socda:

- **Akhriska** – Waxaa lagu weydiinayaa in aad akhriso jumlad af Ingiriis ku qoran. Waxaa lagu siinayaa seddex fursadood. Waa in aad mid saxdo.
- **Qoraalka** – Waxaa lagu weydiinayaa in aad qortid jumlad af Ingiriis ku qoran. Waxaa lagu siinayaa seddex fursadood. Waa in aad mid saxdo.
- **Hadalka** - Sarkaalka USCIS waxaa inta uu wareysiga socdo kugu imtixaamayaa aqoonta in aad ku hadasho af Ingiriiska marka aad ka jawaabayso su'aalaha ku saabsan adiga iyo arjigaaga.

Sidoo kale waxaa lagu weydiin doonaa in aad hadal ahaan uga jawaabto dhowr ah su'aalaha ku saabsan taariikhda iyo dawladda Mareykanka si loo ogaado in aad fahansan tahay. Waxaa jiri doona toban su'aalo. Si aad u gudubto, waa in aad si sax ah uga jawaabto 6 ka mid ah 10-ka su'aal.

Haddii ay da'daadu tahay ugu yaraan 65 sano oo aad ahayd Degganaha Joogtada ah ee Sharciyeesan (qof haysa kaarka cagaaran) ugu yaraan 20 sano, waxaad baran kartaa su'aalo tiradoodu la dhimay.

STUDY QUESTIONS FOR THE CURRENT NATURALIZATION EXAM
SU'AALAHA WAX LAGA BARTO EE IMTIXAANKA JINSIYADDA SOCDA

QUESTIONS	ANSWERS
SU'AALAHA	JAWAABAHA
AMERICAN GOVERNMENT QUESTIONS	
SU'AALAHA KU SAABSAN DAWLADDA MAREYKANKA	
Principles of American Democracy	
Mabaadi'da Dimoqraadiyadda Mareykanka	
1. What is the supreme law of the land?	The Constitution
1. Waa maxay sharciga ugu sarreeya dalka?	Dastuurka
2. What does the Constitution do?	Sets up the government; defines the government; protects basic rights of Americans
2. Muxuu qabtaa Dastuurku?	Waa aasaaska dawladda, wuxuu qeexayaa dawladda; wuxuu difaacayaa xuquuqda muhiimka ah dadweynaha Mareykanka
3. The idea of self-government is in the first three words of the Constitution. What are these words?	“We the People”
3. Ra'yiga is-maamulka waxay ku taal seddexda erey ee ugu horreeya Dastuurka Waa maxay ereyada?	“Innaga oo ah Dadweynaha”
4. What is an amendment?	A change (to the Constitution); an addition (to the Constitution)
4. Waa maxay wax ka beddelidda?	Isbeddel (lagu sameeyo Dastuurka); wax lagu daro (Dastuurka)
5. What do we call the first 10 amendments to the Constitution?	The Bill of Rights
5. Maxaannu ugu yeedhnaa 10-ka waxyaabood ugu horreeya ee laga beddelay Dastuurka	Sharciyada Xuquuqda
6. What is <u>one</u> right or freedom from the First Amendment?	Speech; religion; assembly; press; petition the government

6. Waa maxay <u>hal</u> xuquuq ama xorriyad ee ka tirsan Isbeddelkii ugu Horreeyay?	Hadalka; diinta; kulannada nabadda ku saleysan; saxaafadda; codsiga lagu beddelayo dawladda
7. How many amendments does the Constitution have?	Twenty-seven (27)
7. Waa imisa tirada isbeddelada lagu sameeyay Dastuurka?	Labaatan iyo toddoba (27)
8. What did the Declaration of Independence do?	Announced our independence (from Great Britain); declared our independence (from Great Britain); said that the United States is free (from Great Britain)
8. Muxuu ahaa Bayaanka Xorriyadda?	Waxaa uu ku dhawaaqay xorriyadda aannu ka qaadanay (Ingiriiska); waxaa uu caddeeyay xorriyadda aannu ka qaadanay (Ingiriiska); waxaa uu sheegay in Mareykanka ay xor ka yihiin (Ingiriiska)
9. What are <u>two</u> rights in the Declaration of Independence?	Life; liberty; pursuit of happiness
9. Waa maxay <u>laba</u> xuquuq ee ku yaal Bayaanka Xorriyadda?	Noloshu; xorriyadda; gaaritaanka farxadda
10. What is freedom of religion?	You can practice any religion, or not practice a religion
10. Waa maxay xorriyadda diinta?	Waxaad raaci kartaa diinta aad doonto, ama waxaad xulan kartaa in aadan diin raacin
11. What is the economic system in the United States?	Capitalist economy; market economy
11. Waa maxay nidaamka dhaqaalaha ee Mareykanka?	Dhaqaalaha hantigoosiga; dhaqaalaha suuqa
12. What is the “rule of law”?	Everyone must follow the law; leaders must obey the law; government must obey the law; no one is above the law.
12. Waa maxay “xeerka sharciga”?	In qof waliba uu sharciga u hoggaansanaado; hoggaamiyeyaasha in ay sharciga u hoggaansanaadaan; dawladda in ay sharciga u hoggaansanaato; in uu qofna sharciga ka sarreynin.
System of Government Nidaamka Dawladda	
13. Name <u>one</u> branch or part of the government.	Legislative (Congress); executive (President); judicial (the courts)
13. Waxaad magacawdaa <u>hal</u> laan ama qayb dawladda ka tirsan	Sharci Dejinta (Golaha Umadda); maamulka sare (Madaxweynaha); nidaamka sharciga iyo garsoorka (maxkamadaha)
14. What stops <u>one</u> branch of government from becoming too powerful?	Checks and balances; separation of powers
14. Waa maxay <u>halka</u> wax ee ka is-hortaagaya in laan dawladda ka tirsan ay awood badan yeelato?	Hubinta iyo isku dheelitirka; kala qaybinta awoodaha
15. Who is in charge of the executive branch?	The President
15. Ayaa ka madax ah qaybta maamulka sare?	Madaxweynaha
16. Who makes federal laws?	Congress; Senate and House (of Representatives); (U.S. or national) legislature
16. Yaa soo saara sharciyada dawladda dhaxe?	Golaha Umadda; Golaha Odayaasha iyo Golaha (Wakiilada); (Mareykanka ama qaranka) guddiga sharci dejinta
17. What are the <u>two</u> parts of the U.S. Congress?	The Senate and House (of Representatives)
17. Waa maxay <u>labada</u> qaybood uu ka kooban yahay Golaha Umadda ee Mareykanka?	Golaha Odayaasha iyo Golaha (Wakiilada)
18. How many U.S. Senators are there?	One hundred (100)
18. Waa imisa tirada xildhibaanada ku jira Golaha Odayaasha Mareykanka?	Boqol (100)
19. We elect a U.S. Senator for how many years?	six (6)
19. Muddo intee ah ayaan u dooranaa xildhibaan Golaha Odayaasha ee Mareykanka?	lix (6)

20. Who is <u>one</u> of your state's U.S. Senators?	Patty Murray; Maria Cantwell (Washington state - 2007)
20. Yaa ka <u>mid</u> ah xildhibaanada gobolkaaga ka socda ee ka tirsan Golaha Odayaasha?	Patty Murray & Maria Cantwell (Gobolka Washington - 2007)
21. The House of Representatives has how many voting members?	Four hundred thirty-five (435)
21. Waa imisa tirada xildhibaanada Golaha Wakiiladu ee wax dooran kara?	Afar boqol iyo soddon shan (435)
22. We elect a U.S. Representative for how many years?	Two (2)
22. Imisa sano ayaan xildhibaanaka u dooranaa Golaha Wakiilada ee Mareykanka?	Laba (2)
23. Name your U.S. Representative.	Answers will vary. For information on finding your elected official, you may go to www.house.gov/zip/ZIP2Rep.html or you may ask your local librarian.
23. Magcow Wakiilkaga U.S..	Jawaabuhu wey kala gedisnaan doonaan. Macluumaad la xidhiidha sarkaalka la dooratay, waxaad ka eegi kartaa www.house.gov/zip/ZIP2Rep.html ama waxaad weydiin kartaa maktabadaada degaanka.
24. Who does a U.S. Senator represent?	All people of that state
24. Yuu ka wakiil yahay Xildhibaanaka Golaha Odayaasha Mareykanka?	Dhammaan dadweynaha gobolka oo idil
25. Why do some states have more Representatives than other states?	(Because of) the state's population; (because) they have more people; (because) some states have more people
25. Waa maxay sababta ay gobollada qaarkooda u qabaan Wakiilo ka badan gobollada kale?	(Waxaa u sabab ah) tirada dadweynaha gobolka; (sababtoo ah) waxay qabaan dadweyne ay tiradoodu ka badan tahay; (sababtoo ah) gobollada qaarkooda waxay qabaan dadweyne ka badan
26. We elect a President for how many years?	Four (4)
26. Imisa sano ayaan Madaxweynaha u dooranaa?	Afar (4)
27. In what month do we vote for President?	November
27. Waa maxay bisha aannu dooranno Madaxweynaha?	Nofeembar
28. What is the name of the President of the United States now?	Barack Obama; Obama (2009)
28. Sheeg magaca madaxweynaha United Stateska hadda?	Barack Obama; Obama (2009)
29. What is the name of the Vice President of the United States now?	Joseph R. Biden, Jr.; Joe Biden; Biden
29. Sheega magaca Madaxweyne Ku-Xigeenka United Stateska hadda?	Joseph R. Biden, Jr.; Joe Biden; Biden
30. If the President can no longer serve, who becomes President?	The Vice President
30. Haddii uu Madaxweynuhu xilka qaban karin, yaa noqda Madaxweynaha?	Madaxweyne ku Xigeenka
31. If both the President and the Vice President can no longer serve, who becomes President?	The Speaker of the House
31. Haddii Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku Xigeenka aysan xilka qaban karin, yaa noqonaya Madaxweynaha?	Afhayeenka Golaha Wakiilada
32. Who is the Commander in Chief of the military?	The President
32. Yaa ah Taliyaha Ugu Sarreeya ee ciidanka?	Madaxweynaha
33. Who signs bills to become laws?	The President
33. Yaa qaanuunka saxiixa si uu sharci u noqdo?	Madaxweynaha
34. Who vetoes bills?	The President
34. Yaa qaanuunka diida?	Madaxweynaha
35. What does the President's Cabinet do?	Advise the President
35. Maxay qabtaan Golaha Wasiirada ee Madaxweynaha?	Madaxweynaha ayeey la taliyaan

36. What are <u>two</u> Cabinet-level positions?	Secretary of Agriculture; Secretary of Commerce; Secretary of Defense; Secretary of Education; Secretary of Energy; Secretary of Health and Human Services; Secretary of Homeland Security; Secretary of Housing and Urban Development; Secretary of Interior; Secretary of State; Secretary of Transportation; Secretary of Treasury; Secretary of Veterans' Affairs; Secretary of Labor; Attorney General
36. Maxaa ka mid ah <u>laba</u> jago ee Golaha Wasiirada?	Xoghayaha Beeraha; Xoghayaha Ganacsiga; Xoghayaha Difaaca; Xoghayaha Waxbarashada; Xoghayaha Tamarta; Xoghayaha Adeegyada Caafimaadka iyo Dadweynaha; Xoghayaha Amniga Qaranka; Xoghayaha Guriyeenta iyo Horumarinta Magaalada; Xoghayaha Arrimaha Gudaha; Xoghayaha Arrimaha Dibedda; Xoghayaha Gaadiidka; Xoghayaha Maaliyadda; Xoghayaha Arrimaha Hawlgabka Militariga; Xoghayaha Shaqaalaha; Xeer Ilaaliyaha Guud
37. What does the judicial branch do?	Reviews laws; explains laws; resolves disputes (disagreements); decides if a law goes against the Constitution
37. Laanta Maxkamaduhu maxay qabataa?	Shuruucda ayey dib-u-eegtaa; Shuruucda ayey sharaxdaa; khilaafyada ayey xallisaa (khilaafyada); waxay ka go'aan gaadha haddii sharci ka hor imanaayo dastuurka
38. What is the highest court in the United States?	The Supreme Court
38. Waa maxay maxkamadda ugu sarreysa Mareykanka?	Maxkamadda Sare
39. How many justices are on the Supreme Court?	Nine (9)
39. Waa imisa garsooreyaasha Maxkamadda Sare?	Sagaal (9)
40. Who is the Chief Justice of the United States?	John Roberts (John G. Roberts Jr.)
40. Yaa ah Guddoomiyaha Caddaalada ee Maxkamadda Sare?	John Roberts (John G. Roberts Jr.)
41. Under our Constitution, some powers belong to the federal government. What is <u>one</u> power of the federal government?	To print money; to declare war; to create an army; to make treaties
41. Sida uu qabo Dastuurkayaga, awoodaha qaar waxaa iskaleh dawladda dhexe. Waa maxay <u>mid</u> ka mid ah awoodda dawladda dhexe?	Daabacaadda lacagta; ku dhawaaqidda dagaalka; sameynta ciidanka; sameynta heshiisyada
42. Under our Constitution, some powers belong to the states. What is <u>one</u> power of the states?	Provide schooling and education; provide protection (police); provide safety (fire departments); give a driver's license; approve zoning and land use
42. Sida uu qabo Dastuurkayaga, awoodaha qaar waxaa iskaleh gobollada. Waa maxay <u>mid</u> ka mid ah awoodda gobollada?	Diyaarinta dugsiyada iyo waxbarashada; diyaarinta amniga (booliska); diyaarinta badbaadada (waaxyada dabdemiska); bixinta laysanka darawalka; oggolaashada soonooyinka iyo isticmaalka dhulka
43. Who is the Governor of your state?	<i>Answers will vary.</i> Christine Gregoire (Washington state - 2009)
43. Sheeg magaca Guddoomiyaha statekaaga?	<i>Jawaabuhu wey kala gedisnaan doonaan.</i> Christine Gregoire (Washington state - 2009)
44. What is the capital of your state?	Olympia (Washington state)
44. Waa maxay caasimadda gobolkaaga?	Olympia (gobolka Washington)
45. What are the <u>two</u> major political parties in the United States?	Democratic and Republican
45. Waa maxay <u>labada</u> xisbi maanta ugu weyn Mareykanka?	Dimoqraadiga iyo Jamhuuriga
46. What is the political party of the President now?	Democratic (Party)
46. Sheeg xisbiga siyaasadda ee Madaxweynaha hadda?	Xisbiga Demoqraadiga ah

47. What is the name of the Speaker of the House of Representatives now?	Lqj p'Dqgj pgt
47. Waa maxay magaca Afhayaan Golaha Wakiilada ee haatan?	Lqj p'Dqgj pgt
Rights and Responsibilities Waajibaadka iyo Mas'uuliyadda	
48. There are four amendments to the Constitution about who can vote. Describe <u>one</u> of them.	Citizens 18 and older can vote; you don't have to pay (a poll tax) to vote; a male citizen of any race can vote; any citizen (women and men) can vote
48. Waxaa jira afar isbeddel oo Dastuurka lagu sameeyay ee ku saabsan cidda wax dooran karta. Waxaad sharraxdaa <u>mid</u> ka mid ah.	Dadka jinsiyadda haysta ee jira 18 sano iyo ka weyn ayaa wax dooran kara; ma aha in aad bixiso (canshuurta doorashada); nin jinsiyadda haysta oo qolo kasta ka tirsan ayaa doorashada ka qayb qaadan kara; qof kasta oo jinsiyadda haysta (dumar iyo rag) ayaa doorashada ka qayb qaadan kara
49. What is <u>one</u> responsibility that is only for U.S. citizens?	Serve on a jury; vote in a federal election
49. Sheeg <u>hal</u> xil oo muwaadinka U.S.kaligii saaran?	Ka hawlgal gudi garsoor; Ka codeyn doorasho federal
50. Name <u>one</u> right only for United States citizens?	Vote in a federal election; run for federal office
50. Sheeg <u>hal</u> xaq oo kaliye oo ka mid ah xuquuqda muwaadiniinta United Stateska?	Ka codeyn doorasho federal; u tartamid xafiis federal
51. What are <u>two</u> rights of everyone living in the United States?	Freedom of expression; freedom of speech; freedom of assembly; freedom to petition the government; freedom of worship; the right to bear arms
51. Waa maxay <u>labada</u> xuquuq ee ay leeyihiin qof kasta ee Mareykanka ku nool?	Xorriyadda tacbiirta; xorriyadda hadalka; xorriyadda kulanka nabadda ku saleysan; xorriyadda codsiga loogu gudbinaayo dawladda; xorriyadda cibaadada; xuquuqda ay hubka ku haysan karaan
52. What do we show loyalty to when we say the Pledge of Allegiance?	The United States; the flag
52. Yaan daacad u nahay marka aynu ku dhawaaqno Dhaarta Daacad Noqoshada	Dalka Mareykanka; calanka
53. What is <u>one</u> promise you make when you become a United States citizen?	Give up loyalty to other countries; defend the Constitution and laws of the United States; obey the laws of the United States; serve in the U.S. military (if needed); serve (do important work for) the nation (if needed); be loyal to the United States
53. Waa maxay <u>hal</u> ballanqaad ee aad sameynayso marka aad qaadato jinsiyadda Mareykanka?	In aan ka tanaasulo daacad u noqoshada dalalka kale; in aan difaaco Dastuurka iyo sharciyada Mareykanka; in aan adeeco sharciyada Mareykanka; in aan ka qayb qaato hawlaha militariga ee Mareykanka (haddii loo baahdo); in aan u adeego (qabto hawl muhiim ah) qaranka (haddii loo baahdo); in aan daacad u noqdo Mareykanka
54. How old do citizens have to be to vote for President?	Eighteen (18) and older
54. Waa maxay da'da laga doonayo dadka jinsiyadda haysta in ay ka qayb qaataan doorashada Madaxweynaha?	Sideed iyo toban (18) iyo ka badan
55. What are <u>two</u> ways that Americans can participate in their democracy?	Vote; join a political party; help with a campaign; join a civic or community group; give an elected official your opinion on an issue; call Senators and Representatives; publicly support or oppose an issue or policy; run for office; write to a newspaper
55. Waa maxay <u>labada</u> qaab ee ay dadweynaha Mareykanka uga qayb qaadan karaan dimoqraadiyadooda?	Doorashada; ka qayb galka xisbiga siyaasadeed; saacidda ololaha tartanka; ka qayb galka kooxaha

	bulshada ama waddanka; in ra'yigaaga arrin ku saabsan aad u gudbin kartid qof la doortay; in la wici karo xildhibaanada Golaha Odayaasha iyo Wakiilada; in dadweynaha hortiisa lagu taageeri karo ama looga soo horjeesan karo arrin ama qorshe hawleed; in loo tartami karo jago xafi is; in wargeys la qori karo
56. When is the last day you can send in federal income tax forms?	April 15
56. Waa goorma maalinta u dambeysa ee aad gudbin kartid foomka canshuurta dakhliga ee dawladda dhexe?	Abriil 15
57. When must all men register for the Selective Service?	At age 18; between the ages of 18 and 26
57. Goorma ayeey tahay in ragga oo idil ay isu diiwaan geliyaan Hawsha Qaranka?	Da'da 18; da'da u dhaxeysa 18 iyo 26

**AMERICAN HISTORY QUESTIONS
SU'AALAHA TAARIKHDA MAREYKANKA**

**Colonial Period and Independence
Xilligii La Soo Degayey iyo Xorriyadda**

58. What is <u>one</u> reason colonists came to America?	Freedom; political liberty; religious freedom; economic opportunity; practice their religion; escape persecution
58. Waa maxay <u>hal</u> sabab oo ka mid ah sababihii loo soo degay Mareykanka?	Xorriyadda; xorriyadda siyaasadeed; xorriyadda diinta; fursadda dhaqaale; in ay ku dhaqmaan diintooda; in ay ka baxsadaan saxariirta
59. Who lived in America before the Europeans arrived?	Native Americans; American Indians
59. Yaa ku noolaa Mareykanka inta aysan imaan reer Yurub?	Mareykanka Dhaladka ah; Hindida Mareykanka
60. What group of people was taken to America and sold as slaves?	Africans; people from Africa
60. Waa maxay kooxda dadweynaha ka tirsan ee Mareykanka loo keenay in addoonsi loo iibiyo	Afrikaanka; dadka ka yimid Afrika
61. Why did the colonists fight the British?	Because of high taxes (taxation without representation); because the British army stayed in their houses (boarding, quartering); because they didn't have self-government
61. Waa maxay sababta dadkii soo degay ay ula dagaallameen maamulka Ingiriiska?	Waxaa u sabab ahaa canshuurta oo sarreysay (canshuurta wakiil la'aanta); sababtoo ah ciidanka Ingiriiska ayaa guryahoodii ku noolaa (cunto, hoy); sababtoo ah ma aysan qabin ismaamul dawladeed
62. Who wrote the Declaration of Independence?	(Thomas) Jefferson
62. Yaa qoray Bayaanka Xorriyadda?	(Thomas) Jefferson
63. When was the Declaration of Independence adopted?	July 4, 1776
63. Goormaa la aqbalay Bayaanka Xorriyadda?	Luulyo 4, 1776

QUESTIONS

ANSWERS

SU'AALAHA

JAWAABAHA

64. There were 13 original states. Name <u>three</u> .	New Hampshire; Massachusetts; Rhode Island; Connecticut; New York; New Jersey; Pennsylvania; Delaware; Maryland; Virginia; North Carolina; South Carolina; Georgia
64. Waxaa markii hore jiray 13 gobol. Waxaad sheegtaa <u>seddex</u> ka mid ah.	New Hampshire; Massachusetts; Rhode Island; Connecticut; New York; New Jersey; Pennsylvania; Delaware; Maryland; Virginia; North Carolina; South Carolina; Georgia
65. What happened at the Constitutional Convention?	The Constitution was written; the Founding Fathers wrote the Constitution
65. Maxaa ka dhacay Shirweynihii Dastuurka?	Dastuurka ayaa la qoray; Aabbeyaashii Aasaasay ayaa

	qoreen Dastuurka
66. When was the Constitution written?	1787
66. Goormaa la qoray Dastuurka?	1787
67. The Federalist Papers supported the passage of the U.S. Constitution. Name <u>one</u> of the writers.	(James) Madison; (Alexander) Hamilton; (John) Jay; Publius
67. Waraaqaha ama qoraalada Federalistayaasha waxay gacan ka geysteen gudbinta ama meelmarinta distoorka U.S. Magcow <u>mid</u> ka mid ah qorayaasha.	(James) Madison; (Alexander) Hamilton; (John) Jay; Publius
68. What is <u>one</u> thing Benjamin Franklin is famous for?	U.S. diplomat; oldest member of the Constitutional Convention; first Postmaster General of the United States; writer of “Poor Richard’s Almanac”; started the first free libraries
68. Waa maxay <u>hal</u> wax uu caan ku yahay Benjamin Franklin?	Diblumaasi Mareykan ah; qofkii ugu da’ weynaa Shirweynaha Dastuurka; Madaxii ugu Horreeyay ee Boostada Mareykanka; qoraaga “Poor Richard’s Almanac”; wuxuu billaabay maktabooyinkii ugu horreeyay ee bilaashka ahaa
69. Who is the “Father of Our Country”?	(George) Washington
69. Yaa waaye “Aabbaha Dalkayaga”?	(George) Washington
70. Who was the first President?	(George) Washington
70. Ayuu ahaa Madaxweynihii ugu horreeyay?	(George) Washington
1800s 1800-yadii	
71. What territory did the U.S. buy from France in 1803?	The Louisiana Territory; Louisiana
71. Waa maxay dhulkii uu Mareykanka ka iibsaday Faransiiska sanadkii 1803?	Dhulka Louisiana; Louisiana
72. Name <u>one</u> war fought by the United States in the 1800s.	War of 1812; Mexican-American War; Civil War; Spanish-American War
72. Waxaad sheegtaa <u>mid</u> ka tirsan dagaalladii ay Mareykanka galeen 1800-yadii.	Dagaalkii 1812; Dagaalkii Mareykanka-Meksiko; Dagaalkii Sokeeye; Dagaalkii Mareykanka-Isbaanishka
73. Name the U.S. war between the North and the South.	The Civil War; the War between the States
73. Waxad sheegtaa dagaalkii dhexmaray Koonfurta iyo Waqooyiga Mareykanka.	Dagaalkii Sokeeye; Dagaalkii dhexmaray Gobollada
74. Name <u>one</u> problem that led to the Civil War.	Slavery; economic reasons; states’ rights
74. Waxaad sheegtaa <u>hal</u> dhibaato oo keentay Dagaalkii Sokeeye:	Addoonsiga; sababo dhaqaale; xuquuqda gobollada
75. What was <u>one</u> important thing that Abraham Lincoln did?	Freed the slaves (Emancipation Proclamation); saved (or preserved) the Union; led the United States during the Civil War
75. Muxuu ahaa <u>hal</u> wax muhiim ah ee uu qabtay Abraham Lincoln?	Waxaa uu xorreeyay dadkii la addoonsan jiray (Baaqa Xorriyadda); waxaa uu badbaadiyay (dhawray) Midnimada; Waxaa uu u horseeday Dagaalkii Sokeeye
76. What did the Emancipation Proclamation do?	Freed the slaves; freed slaves in the Confederacy; freed slaves in the Confederate states; freed slaves in most Southern states
76. Muxuu taray Baaqa Xorreynta?	Waxaa uu xorreeyay dadkii la addoonsan jiray; waxaa uu xorreeyay dadkii lagu addoonsan jiray dhulalkii Isku-darsamay; waxaa uu xorreeyay dadkii la addoonsay jiray gobolladii isku darsamay; waxaa uu xorreeyay dadkii lagu addoonsan jiray gobollada Koonfureed
77. What did Susan B. Anthony do?	Fought for women’s rights; fought for civil rights
77. Maxay qabatay Susan B. Anthony?	Waxay u halgantay xuquuqda haweenka; waxay u halgantay xuquuqda dadweynaha

Recent American History and Other Important Historical Information Taariikhda Mareykanka ee Waqtiyadii Dambe iyo Macluumaadka Kale ee Taariikhda ee Muhiimka ah	
78. Name <u>one</u> war fought by the United States in the 1900s.	World War I; World War II; Korean War; Vietnam War; (Persian) Gulf War
78. Waxaad sheegtaa <u>mid</u> ka tirsan dagaalladii ay Mareykanka galeen 1900-yadii.	Dagaalki Dunida I-aad; Dagaalkii Dunida II-aad; Dagaalkii Kuuriya; Dagaalkii Fiyetnaam; Dagaalkii Khaliijka
79. Who was President during World War I?	(Woodrow) Wilson
79. Yaa ahaa Madaxweynaha xilligii Dagaalkii Dunida ee I-aad?	(Woodrow) Wilson
80. Who was President during the Great Depression and World War II?	(Franklin) Roosevelt
80. Yaa ahaa Madaxweynaha xilligii Hoos u Dhaca Dhaqaale iyo Dagaalkii Dunida ee II-aad?	(Franklin) Roosevelt
81. Who did the United States fight in World War II?	Japan, Germany, and Italy
81. Yuu Mareykanka la dagaallay Dagaalkii Dunida ee II-aad?	Japan, Germany, iyo Italy
82. Before he was President, Eisenhower was a general. What war was he in?	World War II
82. Inta uusan noqon Madaxweyne, Eisenhower wuxuu ahaa janan. Waa maxay dagaalkii uu ka qayb qaatay?	Dagaalkii Dunida ee II-aad
83. During the Cold War, what was the main concern of the United States?	Communism
83. Xilligii Dagaalkii Qaboobaa, muxuu ahaa walwalkii ugu weynaa ee uu Mareykanka qabay?	Shuuciyadda
84. What movement tried to end racial discrimination?	Civil rights (movement)
84. Muxuu ahaa dhaqdhaqaaqii isku dayey in la baabi'iyo midabtakoorka?	(Dhaqdhaqaaqa) Xuquuqda dadweynaha
85. What did Martin Luther King Jr. do?	Fought for civil rights; worked for equality for all Americans
85. Muxuu qabtay Martin Luther King Jr.?	Waxaa uu u halgamay xuquuqda dadweynaha; waxaa uu ka shaqeeyay sinnaanta dadweynaha Mareykanka oo idil
86. What major event happened on September 11, 2001 in the United States?	Terrorists attacked the United States
86. Maxay ahayd dhacdadii weyneyd ee ka dhacday Mareykanka Sebtembar 11, 2011?	Argagixiso ayaa Mareykanka soo weerartey
87. Name <u>one</u> American Indian tribe in the United States. (USCIS officer will be supplied with a list of federally recognized American Indian tribes)	Cherokee; Navajo; Sioux; Chippewa; Choctaw; Pueblo; Apache; Iroquois; Creek; Blackfeet; Seminole; Cheyenne; Arawak; Shawnee; Mohegan; Huron; Oneida; Lakota; Crow; Teton; Hopi; Inuit
87. Sheeg ama magcow hal qabiil oo Hindida United Stateska ka mid ah (xafiiska USCIS waxa la siin doonaa liisto qabiilooyinka la aqoonsanyahay ee Hindida Mareykanka ah)	Cherokee; Navajo; Sioux; Chippewa; Choctaw; Pueblo; Apache; Iroquois; Creek; Blackfeet; Seminole; Cheyenne; Arawak; Shawnee; Mohegan; Huron; Oneida; Lakota; Crow; Teton; Hopi; Inuit
INTEGRATED CIVICS QUESTIONS SU'AALAHA AQOONTA BULSHADA EE LA ISU KEENAY	
Geography	
Juquraafiga	
88. Name <u>one</u> of the two longest rivers in the United States.	Missouri (River); Mississippi (River)
88. Waxaad sheegtaa <u>mid</u> ka mid ah labada webi ugu dhaadheer ee Mareykanka.	Missouri (Webi); Mississippi (Webi)
89. What ocean is on the West Coast of the United States?	Pacific (Ocean)
89. Waa maxay badweynta ku taal Xeebta Galbeed ee Mareykanka?	Basiifikada (Badweynta)

90. What ocean is on the East Coast of the United States?	Atlantic (Ocean)
90. Waa maxay badweynta ku taal Xeebta Bari ee Mareykanka?	Atalantik (Badweynta)
91. Name <u>one</u> U.S. territory.	Puerto Rico; U.S. Virgin Islands; American Samoa; Northern Mariana Islands; Guam
91. Waxaad sheegta <u>hal</u> dhul oo Mareykanka ka tirsan.	Puerto Rico; U.S. Virgin Islands; American Samoa; Northern Mariana Islands; Guam
92. Name <u>one</u> state that borders Canada.	Maine; New Hampshire; Vermont; New York; Pennsylvania; Ohio; Michigan; Minnesota; North Dakota; Montana; Idaho; Washington; Alaska
92. Waxaad sheegtaa <u>mid</u> ka mid ah gobollada la jaarka ah Canada.	Maine; New Hampshire; Vermont; New York; Pennsylvania; Ohio; Michigan; Minnesota; North Dakota; Montana; Idaho; Washington; Alaska
93. Name <u>one</u> state that borders Mexico.	California; Arizona; New Mexico; Texas
93. Waxaad sheegtaa <u>mid</u> ka mid ah gobollada la jaarka ah Mexico.	California; Arizona; New Mexico; Texas
94. What is the capital of the United States?	Washington, D.C.
94. Waa maxay caasimadda Mareykanka?	Washington, D.C.
95. Where is the Statue of Liberty?	New York (Harbor); Liberty Island [Also acceptable are New Jersey, near New York City, and on the Hudson (River).]
95. Waa maxay Taallada Xorriyadda?	New York (Harbor); Liberty Island [Sidoo kale waxaa la aqbalayaa New Jersey, ku dhow Magaalada New York, iyo (Webiga) Hudson.]
Symbols Calaamadaha	
96. Why does the flag have 13 stripes?	Because there were 13 original colonies; because the stripes represent the original colonies
96. Waa maxay sababta uu calanka u leeyahay 13 diillimo?	Waxaa ugu wacan 13-ka gobol ee ugu horreeyay ee la soo dego; waxaa diillimaadka ugu wacan dhulalkii ugu horreeyay ee la soo degay
97. Why does the flag have 50 stars?	Because there is one star for each state; because each star represents a state; because there are 50 states
97. Waa maxay sababta uu calanka u leeyahay 50 xiddigo?	Xiddig waliba waxay u taagan tahay gobol kasta; sababtoo ah xiddig walba waxaa uu u taagan yahay gobol; sababtoo ah waxaa jira 50 gobol
98. What is the name of the national anthem?	The Star-Spangled Banner
98. Waa maxay magaca heesta calanka?	The Star-Spangled Banner
Holidays Ciidaha	
99. When do we celebrate Independence Day?	July 4
99. Goorma ayaan u xafladeynaa Maalinta Xorriyadda?	Luulyo 4-eeda
100. Name <u>two</u> national U.S. holidays.	New Year's Day; Martin Luther King Jr. Day; Presidents Day; Memorial Day; Independence Day; Labor Day; Columbus Day; Veterans Day; Thanksgiving; Christmas
100. Waxaad magacawdaa <u>laba</u> ka mid ah ciidaha Mareykanka.	Maalinta Sanadka Cusub; Dhalashada Martin Luther King Jr.; Dhalashada Madaxweynaha; Maalinta Xusuusta Day; Maalinta Xorriyadda; Maalinta Shaqaalaha; Maalinta Columbus; Maalinta Hawlgabka Militariga; Mahadcelinta; Maalinta Ciidda Masiixiga

Study Questions for ELDERLY APPLICANTS for the CURRENT Version of the Exam
Su'aalaha Wax Laga Barto ee Loogu Talagalay WAAYEELKA ARJIGA SOO GUDBINAYA ee Imtixaanka
SOCDA

Dadka ay da'doodu ka badan tahay 65 sano kuwaasoo ah Degganaha Joogtada ah ee Sharciga haysta (oo qaba kaarka cagaaran) islamarkaana ku noolaa Mareykanka iyagoo ah Degganaha Joogtada ah ee Sharciga haysta ugu yaraan muddo 20 sano waxay qabaan shuruudaha aqoonta bulshada (taariikhda iyo dawladda) oo ka duwan. Sidoo kale waxaa suuragal ah in luqaddooda hooyo lagu imtixaano. Waxaad eegtaa *Qaybta E* haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah.

1. What is <u>one</u> right or freedom from the First Amendment?	Speech; religion; assembly; press; petition the government
1. Waa maxay <u>hal</u> xuquuq ama xorriyad ee ka tirsan Isbeddelkii ugu Horreeyay?	Hadalka; diinta; kulannada nabadda ku saleysan; saxaafadda; codsiga lagu beddelayo dawladda
2. What is the economic system in the United States?	Capitalist economy; market economy
2. Waa maxay qaabka dhaqaalaha ee Mareykanka?	Dhaqaalaha hantigoosiga; dhaqaalaha suuqa
3. Name <u>one</u> branch or part of the government.	Legislative (Congress); executive (President); judicial (the courts)
3. Waxaad sheegtaa <u>hal</u> laan ama qayb dawladda ka tirsan	Sharci Dejinta (Golaha Umadda); maamulka sare (Madaxweynaha); nidaamka sharciga iyo garsoorka (maxkamadaha)
4. What are the <u>two</u> parts of the U.S. Congress?	The Senate and House (of Representatives)
4. Waa maxay <u>labada</u> qaybood uu ka kooban yahay Golaha Umadda ee Mareykanka?	Golaha Odayaasha iyo Golaha (Wakiilada)
5. Who is <u>one</u> of your state's U.S. Senators?	Patty Murray; Maria Cantwell (Washington state - 2009)
5. Yaa ka <u>mid</u> ah xildhibaanada gobolkaaga ka socda ee ka tirsan Golaha Odayaasha?	Patty Murray & Maria Cantwell (Gobolka Washington - 2009)
6. In what month do we vote for President?	November
6. Waa maxay bisha aannu dooranno Madaxweynaha?	Nofeembar
7. What is the name of the President of the U.S. now?	Barack Obama; Obama (2009)
7. Waa maxay magaca Madaxweynaha Mareykanka ee haatan?	Barack Obama ; Obama (2009)
8. What is the capital of your state?	Olympia (Washington state)
8. Waa maxay caasimadda gobolkaaga?	Olympia (gobolka Washington)
9. What are the <u>two</u> major political parties in the United States?	Democratic and Republican
9. Waa maxay <u>labada</u> xisbi maanta ugu weyn Mareykanka?	Dimoqraadiga iyo Jamhuuriga
10. What is <u>one</u> responsibility that is only for U.S. citizens?	Serve on a jury; vote
10. Waa maxay <u>hal</u> waajib ee loogu talagalay oo kaliya dadka haysta jinsiyadda Mareykanka?	In ay qayb qaataan hawlaha garsooraha dadweynaha; doorashada
11. How old do citizens have to be to vote for President?	Eighteen (18) and older
11. Waa maxay da'da laga doonayo dadka jinsiyadda haysta in ay ka qayb qaataan doorashada Madaxweynaha?	Sideed iyo toban (18) iyo ka badan
12. When is the last day you can send in federal income tax forms?	April 15
12. Waa goorma maalinta u dambaysa ee aad gudbin kartid foomka canshuurta dakhliga ee dawladda dhexe?	Abril 15
13. Who was the first President?	(George) Washington
13. Ayuu ahaa Madaxweynihii ugu horreeyay?	(George) Washington

14. What was <u>one</u> important thing that Abraham Lincoln did?	Freed the slaves (Emancipation Proclamation); saved (preserved) the Union; led U.S. during the Civil War
14. Muxuu ahaa <u>hal</u> wax muhiim ah ee uu qabtay Abraham Lincoln?	Waxaa uu xorreeyey dadkii la addoonsan jiray (Baaqa Xorriyadda); waxaa uu badbaadiyay (dhawray) Midnimada; Waxaa uu u horseeday Dagaalkii Sokeeye
15. Name <u>one</u> war fought by the United States in the 1900s.	World War I; World War II; Korean War; Vietnam War; (Persian) Gulf War
15. Waxaad sheegtaa <u>mid</u> ka tirsan dagaalladii ay Mareykanka galeen 1900-yadii.	Dagaalkii Dunida I-aad; Dagaalkii Dunida II-aad; Dagaalkii Kuuriya; Dagaalkii Fiyetnaam; Dagaalkii Khaliijka
16. What did Martin Luther King Jr. do?	Fought for civil rights; worked for equality for all Americans
16. Muxuu qabtay Martin Luther King Jr.?	Waxaa uu u halgamay xuquuqda dadweynaha; waxaa uu ka shaqeeyay sinnaanta dadweynaha Mareykanka oo idil
17. What is the capital of the United States?	Washington, D.C.
17. Waa maxay caasimadda Mareykanka?	Washington, D.C.
18. Where is the Statue of Liberty?	New York (Harbor); Liberty Island [Also acceptable are New Jersey, near New York City, and on the Hudson (River).]
18. Waa maxay Taallada Xorriyadda?	New York (Dekedda) ; Liberty Island; [Sidoo kale waxaa la aqbalayaa New Jersey, ku dhow New York City, iyo ku taal (Webiga) Hudson.]
19. Why does the flag have 50 stars?	Because there is one star for each state; because each star represents a state; because there are 50 states
19. Waa maxay sababta uu calanka u leeyahay 50 xiddigo?	Xiddig waliba waxay u taagan tahay gobol kasta; sababtoo ah xiddig walba waxaa uu u taagan yahay gobol; sababtoo ah waxaa jira 50 gobol
20. When do we celebrate Independence Day?	July 4
20. Goorma ayaan u xafladeynaa Maalinta Xorriyadda?	Luulyo 4-eeda